


Maalintii aan ka tagay guriga
een magalada aaday



✎ Lesley Koyi, Ursula Natula

🔗 Brian Wambi

📧 Abdi Muse

🗣️ somali

📖 nivå 3

(uten bilder)



Barnebøker for Norge

barnebok.no

Maalintii aan ka tagay guriga een

magalada aaday

Skrevet av: Lesley Koyi, Ursula Natula

Illustrert av: Brian Wambi


Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barnebok.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.


Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no>



Boosteejada yar ee tuuladeyna waxa ay aheyd mid mashquulsan dadka awgeed iyo bases la rar dhaafiyay. Dhulka xitaa waxaa yaalay wax badan oo in la raro aheyd. Kirishbooyada ayaa ku dhawaaqayay magacyada meelaha ay basaskooda u socdaan.




“Magaalada, Magaalada, Waxuu u socdaa Galbeedka!” Ayaan maqalay kirishbooy ku dhawaqaya. Kaasi aya ahaa baskii aan u baahnaa in aan raaco.




Baska magaalada ku dhawaad wuu buuxay, laakiin dad badan ayaa wali isku soo riixaayay in ay in koraan. Qaar baa xamuuulkoodi baska hoostiisa gashaday. Qaar kalena waxay dhigteen mesha kabaha lasaaranayay.



Baski soo noqonayay ayaa si dhakhso ah u buuxsamaayay. Dkakhso waxuu ku laaban doonaa bariga. Hada waxa iigu muhiimsan waxay ahayd inaan bilaabo raadinta guriga adeerkay.



Rakaabka cusub ayaa ruxaayay
tikidhooda markay raadinaayeen meel
ay ka fariistaan baska dadku ku badan
yihiin. Dumarka haysta caruurta yaryar
waxay ku raaxaysan hayeen safar ka
dheer.




Sagaal saacadood kaddib, waxaan ku
toosay buuq weyn iyo wicitan ka rakaabkii
ku noqonaayay tuuladayda. Waxaan soo
qaatay bacdaydi yarayd waana ka boodey
baskii.




Waxaan is ku nabay xaga xigto daaqada. Qofka fadhiyay agtayda waxuu si adag u hayay bac cagaaran. Wuxuu soo xidhay kabo duug ah, jaakad dildilaacsan, wuxuuna u muuqday mid aad u xanaaqsan.



Markan jidka sii soconay waxaan sii xifdiyay magaca meesha uu adeerkey kaga noolaa magaalada weyn. Waxaan wali si hoose u sii shekeysan hayay markii aan hurday.



Waxaan fiiriyey banaanka baska oo
waxaan ogaaday inaan ka tagayo
tuuladayda, meeshii aan ku koray. Waxaan
u socday magaalada weyn.




Laakiin maskaxdayda ayaa dib ugu
laabatay guriga. Hooyaday miyay amaan
ahan doontaa? Miyuu bakaylahaygu ii gali
doona wax lacag ah? Walaalkay miyuu
xusnaan doonaa in uu geedahaygi
waraabiyo?




Raritaankii ayaa la dhameeyey, rakaabkii oo dhanne waa la fadhiisiyay. Wareejiya yaashii wali waxay is ku soo riixahayeen baska si ay oga iibiyaan alaabadooda rakaabka. Qof kasta wuxuu ku qaylinayay magacyada waxa loo diyaariyey iibka. Ereyada ayaa iila muuqday kuwo cajiib ah.



Intii safarka sii gudo galnay, gudaha baska ayaa aad u kululaaday. Waxaan is ku xidhay indhaha anigoo rajeynayo in aan seexdo.




Rakaab yar aya*aa* iibsaday cabitaan, qaar kalena waxay iibsadeen cunto fudud oo yar yar waxayna bilaabeen inay calaliyaan. kuwa aan haysan lacag, sida aniga oo kale, way daawanaayeen.



Sidaas tuu baska uga dhagaqay boostejada baska, waxaan daaqada ka eegay bananka. Waxaan si la yaab leh uga fikiray in aan abid kuso laaban doonto tuulada.



Hawlahani waxaa kala gooyay baska hoonkisa, calaamad muujinayso in aan diyaar u nahay inaan baxno. Rakaabiyihii wuxuu ku qayliyay wareejiya yaashii si ay baska uga dagaan.



Wareejiya yaashii ayaa isku riixay si ay uga dagaan baska. Qaarkood waxay sii yeen baaqigoda rakaabkii. Kuwa kale waxay sameeyeen daqiiqadkii ugu dambeeyey ee iibinta alaabooyin badan.